

**OGAYSIISKA ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO EE DHAGEYSIGA DADWEYNAHA IYO
OGAYSIISKA HELIDDA**

**CONSORTIUM-KA DEGMADA SAN DIEGO
QORSHAHA SANNADLAHA EE SANAD-MAALIYADEEDKA 2026–27**

**DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA (CDBG), BARNAAMIJKA ISKAASHIGA MAALGELINTA
GURYEEYNTA (HOME), DEEQDA XALLINTA XAAALADAHA DEGDEGGA AH (ESG), IYO
BARNAAMIJKA FURSADAHA GURYEEYNTA EE DADKA QABA HIV/AIDS (HOPWA)**

Waxaa halkan lagu ogeysiinayaa in Guddiga Kormeerayaasha Degmada San Diego (Guddiga) ay qaban doonaan dhageysi dadweyne maalinta 24-ka Maarso, 2026, saacadda 9:00 subaxnimo, Qolka 310 ee Xarunta Maamulka Degmada, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA, si loo tixgeliyo Qorshaha Sannadlaha ah ee Sannad-Maaliyadeedka (FY) 2026-27. Guddigu wuxuu tixgelin doonaa isticmaalka la soo jeediyay ee qiyaasta ah: \$4,232,730 oo ka mid ah lacagaha Deeqda Horumarinta Bulshada (CDBG); \$2,834,075 oo ka mid ah lacagaha Barnaamijka Iskaashiga Maalgashiga Guryaha (HOME); \$376,429 oo ka mid ah lacagaha Deeqda Xallinta Xaaladaha Degdegga ah (ESG); iyo \$6,434,968 oo ka mid ah lacagaha Barnaamijka Fursadaha Guryeynta ee Dadka qaba HIV/AIDS (HOPWA), kuwaas oo Degmadu ka heli doonto Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Mareykanka (HUD). Guddigu wuxuu sidoo kale tixgelin doonaa isticmaalka la soo jeediyay ee qiyaastii \$2,000,000 oo ka mid ah dakhliga barnaamijyada CDBG, HOME, iyo HOPWA ee FY 2026-27, iyo dib-u-qaybinta qiyaastii \$7,000,000 oo ka mid ah xuquuqihii barnaamijyada HOME, CDBG, iyo HOPWA ee sannadihii hore. Tirooyinkan waxay ku saleysan yihiin heerarka maalgelinta ee sannadihii hore.

Qorshaha Sannadlaha ah wuxuu faahfaahinayaa hawlaha la soo jeediyay ee lagu maalgelin doono FY 2026-27 iyo xuquuqihii maalgelinta ee sannadihii hore, kuwaas oo ay waajib tahay inay waafaqaan yoolalka lagu dejiyay Qorshaha Isku-dhafaan ee 2025-29.

Barnaamijyada CDBG iyo ESG waxay bixiyaan maalgelin loogu talagalay aagga Degmada ee aan degmo ahaan loo aqoonsan, iyo magaalooyinka Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach, kuwaas oo sidoo kale loo yaqaan Urban County. Lacagaha CDBG waa inay: (1) u faa'iideeyaan dadka dakhligoodu hooseeyo; (2) ka hortagaan ama tirtiraan xaafadaha burbursan iyo dayaca; ama (3) daboolaan baahiyaha degdegga ah ee horumarinta bulshada. Barnaamijka ESG wuxuu maalgelinayaa gargaarka dadka hoyla'aanta ah ee ku nool Urban County. Barnaamijka HOME wuxuu maalgelinayaa hawlaha guryaha la awoodi karo ee ka jira Isbahaysiga HOME ee Degmada. Isbahaysiga HOME wuxuu ka kooban yahay Urban County, iyo sidoo kale magaalooyinka Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista. Barnaamijka HOPWA wuxuu maalgelinayaa guryeynta iyo adeegyada loogu talagalay dadka qaba HIV/AIDS iyo qoysaskooda guud ahaan Degmada San Diego.

Nuqullo ka mid ah Qorshaha Sannadlaha ah ee qabyo-qoraalka ah ayaa loo heli karaa dadweynaha si ay u eegaan una dhiibtan faallooyin inta lagu jiro muddada faallooyinka ee 30-ka maalmood ah, laga bilaabo Febraayo 20, 2026, ilaa Maarso 24, 2026, iyada oo laga heli karo bogga internetka ee Degmada ee sdhcd.org. Faallooyinka qoraalka ah waa in loo gudbiyaa Adeegyada Guryaha iyo Horumarinta Bulshada, Qaybta Horumarinta Bulshada, 3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123, ama iimayl ahaan loogu diro cinwaanka Community.Development@sdcounty.ca.gov. Dadka dhagaha la' ama maqalkoodu daciif yahay waxay la xirii karaan waaxda iyagoo wacaya lambarka (866) 945-2207. Dadka u baahan caawimaad si ay uga qayb qaataan kulanka (kuwa aan ku hadlin Ingiriisiga, dadka maqalkoodu daciif yahay, iwm.) waa inay la xiriiraan shaqaalaha ugu yaraan shan maalmood ka hor kulanka si ay u codsadaan diyaarin gaar ah.

LAGU ANSIXIYAY QAABKIISA IYO SHARCINIMADIISA
Damon M. Brown, La-taliyaha Sharciga ee Degmada
QORAAL: Jane Rhee, Ku-xigeenka La-taliyaha Sharciga ee Degmada